



2020-2021

FOOMKA OGGOLAANSHAHA WARBAAHINTA

Waalidiinta/Masuuliyiinta,

Shaqaalaha Dugsiyada Dadwaynaha Saint Paul, ururada bulshada iyo xubno matalaya is-gaarsiinta ayaa laga yaabaa inay xog-waraystaan, sawiraan, ama fiidiyow ka duubaan ilmahaaga si ay ugu isticmaalaan jaraa' idka, warbixinta talefishinka, akhbaarta dadwaynaha loo soo bandhigayo iyo internet-ka. Sawirada waxaa laga yaabaa inay ka koobnaadaan koox arday ah ama ardayga kaligii, isla markaana waxaa laga yaabaa in ardayda magacyadooda la isticmaalo. Si' loo ilaaliyo xuquuqda ardayda internet-kana ay uga nabad galaan, sawirka ardayga iyo magaciisa isku mar laguma daabacayo ama ku soo wada bixi maayaan baraha internet-ka ee iskuulka ama Degmada.

Fadlan qaybta hoose ee foomkan soo dhamaystir oo ku soo celi xafiiska iskuulka.

Waxaan kugu mahadinaynaa iskaashiga aad nala samayso si aad noogu caawiso inaan muujino shaqada wanaagsan iyo dadaalka ardaydeena iyo macalimiinteena.

Fadlan mid ka calaamadee:

- Waxaan fasaxayaa in ilmahayga la sawiro oo xog-waraysi lala yeesho; waxaa kale oo aan fasaxayaa in ilmahayga magaciisa la isticmaalo. Haddii sawirka ilmaha lagu isticmaalayo bogga interneetka ee iskuulka ama degmada, magaca kowaad ee ardayga oo kaliya ayaa la'isticmaali doonaa.
- Waxaan fasaxayaa in ilmahayga la sawiro, laakiin ma doonayo in ilmahayga magaciisa iyo sawirkiisa la isla isticmaalo.
- Ma doonayo in ilmahayga la sawiro ama xog-waraysi lala yeesho, mana doonayo in magaciisa la isticmaalo.

Magaca Ilmaha

Macalinka Qaabilsan

Saxiixa Waalidka/Masuulka

Taakhiikhda Maanta

Waxyaabaha aad foomkaan ka dooratay waxay dhacayaan Agoosto 31, 2021

Fadlan ogow, waa inaad soo buuxisaa foomka loo yaqaano (The Denial of Release of Directory Information) haddii aadan doonaynin in dhammaan macluumaadka ilmahaaga ku saabsan aan la daabicin, sida, magaca, sawirka, buugga sanadlaha ah, abaal marinada, barnaamijyada qalin jabinta, iwl. Si aad u diido in macluumaadkan la daabaco ama la sii daayo, fadlan la xiriiir Xarunta Meelaynta ee Ardayda ood ka wici karto 651-632-3760.